

SHEEKADAADA
Miyaad garanaysaa?
Bal is tijaabi!

**MAXAAD TAN U AKHRINAYSAA?** Ma akhrisay buugga adduunkoo dhan si fiican ugu gadmay, kaasoo ah *KITAABKA QUDUUSKA AH (BAYBALKA)*? Kaasi waa buugga diiwaangelinaya wixii lasoo dhaafay, waqtiga la joogo iyo waxa soo socda ee taariikhda binu aadanka. Baybalka wuxuu qaadanaya ku dhawaad 70 saacadood in la akhristo. *SHEEKADAADA* waxay ka koobantahay sheekadiisa iyo farriintiisa cajiibka ah oo ay kugu qaadanaysa hal saac ka yar inaad ku akhrisatid.

"**Edbintayda** *qaata,* **lacagse** *ha qaadanina,*
*Oo* **aqoontana** *ka hor doorta* **dahabka** *saafiga ah.*
*Waayo,* **xigmaddu** *waa ka sii wanaagsan tahay* **luulka**,
*Oo wax alla waxa la damci karo oo dhanna iyada lalama simi karo."*
*— Abuurahaaga (Maahmaahyadii 8:10-11)*

**WAX KU SAABSAN QORAHA:** Paul D. Bramsen wuxuu noloshiisa badanaa ku qaatay Senegaal, oo ah waddan Muslim u badan kuna yaala Saxaraha geeskiisa. Qoraalladiisu waxay ka imaadaan jacaylkuu u qabay Qorniinnada iyo kumanaan hadal oo uu la yeeshay Muslimiinta saaxiibbadiis ahayd kuwaasoo jooga Senegaal iyo agagaarka dunida.

SHEEKADAADA SI FIICAN MA U GARANAYSAA?

1. Waa maxay magacyada waalidkaa?
2. Waa maxay magacyada ayeeydaa iyo awoowgaa? (Waxaad leedahay 4.)
3. Waa maxay magacyada abootooyinkaaga? (Waxaad leedahay 8.)
4. Abootooyinkaaga iyo abootooyinkooda? (Waxaad leedahay 512!)

Haddii lagu siiyo dahabka adduunka ku jiroo dhan—miyaad sheegi kartaa magacyada awoowayaashaa iyo ayeeyeyaashaa mid walba (dhammaan 512 ee awoowayaashaa lab iyo dheddig ah) oo ay toban qarniyo kasoo wareegatay? Malaga yaabo! Maxay ku dhici waysay? Waayo muddo dheer ma haysanin diiwaanka qoran ee awoowayaasha.

Haddaba ka fikir qayb uga hore sheekadaada—qayb taariikh ah oo ka qiima badan dahabka.

Awoowayaashaadii ugu horreeysay. Maxaad ka taqaanaa iyaga?
Haddii aysan jiri lahayn diiwaan qoran oo ku saabsan sheekadooda, ma garan kartid halkaad ka timaaday ama waxaad halkaan u joogtid. Si mahadcelin leh, waxaa jira diiwaankaas. Ma garanaysaa wuxuu leeyahay?







Kitaabka la yiraahdo *Kitaabka Quduuska Ah (Baybalka)*[1] maahan keliya inuu yahay kitaabka adduunkoo dhan si fiican uga gadmay oona yahay kan ugu turjumaad badan, laakiinse wuxuu yahay kan farriintiisa si fiican loo dhowray oo qadiimiga ah.[2] Baybalka, kaasoo sheeganaya inuu yahay *Ereyga Ilaah*, waxaa loo kala qaybiyey labo qaybood:

**Qaybtii 1:** Axdigii Hore (Tawreedda, Sabuurrada, iwm.) – *Qorshaha Ilaah ee la sii sheegay*
**Qaybtii 2:** Axdiga Cusub (Injiilka, iwm.) – *Ilaah qorshahiisa oo la oofiyey*

**Laakiin sidee baan ku ogaan karnaa in qoraalladu runtii yihiin diiwaankii *Ilaah?***
Waan garan karnaa, waayo waxay leeyihiin caddaymo aan buug kale lagu arkin, sida:

- **Joogtayn kaamil ah.** Qorniinnada waxaa qoray darsan nebiyo ah in ka badan toban iyo shan qarni oo lasoo dhaafay oo weliba ah hal farriin oo isku xiran. Waxa keliya oo abuuri kara qoraha waqtigaas ka baxsan.
- **Sheekada.** Binu aadan ka fikiri jiray ma lahan sheekadan adag. Qayb kasta si fiican bay isu qaadataa. Waxay ka jawaabtaa su'aalaha nolosha ugu waawayn, dadka bay rajo siisaa, waxayna beddeshaa nolosha.
- **Boqolaal waxyiyo oo oofiyey.** Ilaah keliya ayaa taariikhda muujin kara intay dhacin ka hor.


[1]Quduusnimadu macnaheedu waa nadiirnimada ama gooni loo dhigo. Ereyga Baybalka wuxuu ka yimaaday af Gariigga taaso ereyga yahay Biblia, oo macnaheedu yahay buugag ama maktabad.
[2]Bal fiiri cutubka saddexaad ee buugga ILAAH KELIYA IYO KITAAB KELIYA: www.one.god-one-message.com



**Sheekadaada** waxay ku bilaabataa *Ilaah*. Binu aadanku wuxuu qabaa fikrado badan oo ku saabsan asalka awoowayaashaadii hore, Kitaabka Bilowgii (kan macnihiisu yahay *asalka*) waa diiwaankii Kaasoo halkaas joogay goortii ay wax walba bilaabmeen.

***"Bilowgii Ilaah** samada iyo dhulkuu abuuray."* (Bilowgii 1:1, Tawreedda)


**Ilaah miyuu jiraa?** Abuurkiisa baa su'aashaas ka jawaabaya, isagoo caddayn difaacaya leh. *"Oo dhulkana wuxuu ka laalaadshaa wax aan waxba ahayn."* (Nebi Ayuub 26:7) "*Cirkuna wuxuu muujiyaa sancadii gacantiisa."* (Nebi Daa'uud, Sabuurradii 19:1)



Ka hadalka gacmaha, kuwaada fiiri. Yaa kale oo aan ka ahayn farsamayaqaan heer sare ah oo sameeyn kara qalabka noocaas ah? Xigmad iyo awood noocee ayaa loo baahanyahay in la sameeyo hal bilyaan oo ururka xiddigaha? Ama inaad isku dabaac-tosho unuggii duntiisa oo aad u yar oo duuban oo socdaan calaamado kooban oo lagu gudbiyo sirta kaasoo *adiga* ku sameeynayo?

*"RABBIYOW… Oo adigaa igu daboolay maxalkii hooyaday. Waan kugu mahadnaqi doonaa, waayo, waxaa la ii sameeyey si cabsi iyo yaab badan!"* (Sabuurradii 139:1,13-14)

**Ilaah muxuu yahay? Waa Kan aan xadka lahayn oo ka dambeeya Abuuraha caalamkoo dhan. Ma lahan bilow ama dhammaad.** Waa "*Aabbaha ruuxyada*" (Cibraaniyada 12:9) kaasoo abuuray malaa'igaha ku jira jannada iyo awoowayaashaadii ugu horreeysay ee dhulka jooga si ay u gartaan, u jeclaadaan, u caabudaan, weligoodna Isaga ugu adeegaan. Ilaah waa hal, laakiin meel walbuu joogi karaa isla waqtigaas. Magaciisu waa RABBIGA, waa Kan isku filan. Waxba ma u baahno, laakiin wuxuu doonaya in la garto oo la jeclaado. Waa *Ilaaha Qaadirka Ah*, kaasoo *Ereygiisa* iyo *Ruuxiisa* adduunku ay ku abuurmeen.



*Bilowgii **Ilaah** samada iyo dhulkuu abuuray. Dhulkuna qaab ma lahayn, wuuna madhnaa; gudcurna moolkuu dul joogay; oo **Ruuxa Ilaahna** wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayey biyaha. **Ilaahna wuxuu yidhi**, Iftiin ha ahaado: iftiin baana ahaaday. Ilaahna wuxuu arkay iftiinkii inuu wanaagsan yahay: Ilaahna iftiinkii ayuu ka soocay gudcurkii." (Bilowgii 1:1-4)*

Maalintii ugu horreeysay ee abuurka Ilaaha ammaantiisa iyo iftiinkiisa waxay ka awood badiyeen mugdiga. *"**In Ilaah nuur yahay**, oo isaga aan gudcur ku jirin innaba. Haddaynu nidhaahno, Wehelnimo ayeynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno."* (1 Yooxanaa 1:5-6) Abuurahaaga waa kan kaamilka ah. Kuwa keliya ee la noolaan kara waa kuwa kaamilka ah oo saafiga ah. ***"Rabbiga waa quduus."*** (Sabuurradii 99:9)

Lix maalmood oo isku xigta buu Ilaah kaas oo ah iftiin abuuray jawiga, dhulka, badda, dhirta, qorraxda, bisha, xiddigaha, kalluumaha, shimbiraha, cayayaannada iyo xayawaannada. Ka warran adduunkan! Haddii si fiican loo xukumi lahaa, dhulkan ma waayeen wax wanaagsan. Waxay noqon lahayd meesha ugu fiican ee binu aadanka guri u noqota.

*"Ilaahna wuxuu yidhi, Aan*[3] *nin inoo eg ka samayno araggeenna, oo iyagu ha xukumeen… dhulka oo dhan.…Oo Ilaah nin buu abuuray…**Ilaah araggiisa** ayuu ka abuuray isaga… lab iyo dhaddig ayuu abuuray."* (Bilowgii 1:26-27)

Kuwo ka duwan boqortooyada xoolaha, binu aadanka waxaa loo sameeyey in laga arko dabeecadda Abuurahooda. Ilaah iyaga wuxuu siiyey naf weligeed ah, caqli badan, dareen dheeraad ah, iyo karti ay ku doortaan saamaynta weligeed ah. Ilaah ma doonaynin mashiin. Wuxuu doonayey in awoowayaashaadii ugu horreeysay ee Aadan iyo Xaawa ay lahaadaan xariir oo keligoodna maahane, laakiinse inay Isaga xitaa xariir la lahaadaan. Sidaas oo kale buu adigana kaa rabaa. ***"Ilaah waa jacayl."*** (1 Yooxanaa 4:8)

[3]Maadaama uu Ilaah HAL yahay, muxuu u yiraahdaa, *"Bal binu aadanka AAN ka sameeyno aragGEENNA…?"* Jawaabta waxaa laga helaa asalka midnimadiisa ee guudka ah. Qorniinnada dhexdooda ereyga *"Ilaah"* ee af Cibraaniga waa Elohim, kaasoo ah *magac jamac ah*. Ereyga loo isticmaalay "*hal*" waa "echad" kaasoo macnihiisu yahay *midnimo oo in la fahmo ay adagtahay*. Aakhiro, isagoon weli malaa'igo ama binu aadanka abuurin, Ilaah wuxuu ku riyaaqay xariirkiisa jacaylka ah iyo xariir ee naftiisa—iyadoo ay la jiraan ereygiisa naftiisa ah iyo Ruuxiisa Quduuska Ah. *"Bal eeg, Ilaah waa wayn yahay, oo annana isaga ma aannu naqaan!"* (Nebi Ayuub 36:26)


## Sharciga Dembiga & Dhimashada

Bilowgii Ilaah iyo binu aadanka saaxiibo bay ahaayeen. Laakiin Ilaah wuxuu qorsheeyey inuu saaxiibtinimadaas tijaabiyo, oo Aadan iyo Xaawa buu siiyey fursad, si ay u xoojiyaan xariirka ay la lahaayeen abuurahooda, iyagoo weliba isaga aamminaayo oona addeecaayo. Xitaa RABBIGA Ilaaha ah intuusan Xaawa abuurin ka hor, wuxuu Aadan dhex dhigay beerta kaamilka ah taaso meelo qurux badan leh, xayawaan gaar ah, mirahana geed walba laga cuni karo—waxa aan hal geed ka ahayn.

*““Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu ninkii ku amray isagoo leh,* ***Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa:*** *laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo,* ***maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa.”*** *(Bilowgii 2:16-17)*

Waa maxay cawaaqibka markaad jabisid halka amar ee Ilaah ku amray?

Ilaah miyuu ku yiri Aadan hadduu cuno miraha geedka la mamnuucay waa inuu bilaabo isticmaalka tusbaxa, tukashada, soonka, inuu bixiyo sadaqada, inuu tago meelaha dadku diinta darteed iskugu yimaadaan, inuu camal wanaagsan sameeysto, si uusan camalkiisa xun “u badanin”, kadibna Ilaah naxariistiisa rajeeyo? Ma waxaas buu Ilaah yiri? **Waa maya!!!**



Ilaah wuxuu Aadan ku yiri DEMBIGA waa in **DHIMASHO** loo bixiyaa. Baybalka wuxuu leeyahay, “***qaynuunka dembiga iyo dhimashada.***” (Rooma 8:2)

Sharcigan ugu horreeyey ee Ilaah binu aadanka siiyey waxay ku siinaysaa inaad fahanto sheekadaada—wixii la soo dhaafay, tan la joogo iyo tan soo socoto.

**Dembiga** (jabinta sharciga Ilaah) wuxuu keenay **saddex qaybood oo kala fogaansho ah:**

1. **Dhimashada Ruuxiga Ah:** kala fogaanshaha binu aadanka ruuxiisa iyo Ilaah.
2. **Dhimashada Jirka Ah:** kala fogaanshaha nafta iyo jirka.
3. **Dimashada Weligeed Ah:** kala fogaanshaha Ilaah oo weligeedna naarta lagu jiro, *"dabka weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey."* (Matayos 25:41)



Macnaha dhimashada waxaa lagu tusaalayn karaa geed laantiisa. Laanta isla markii ay geedka ka jabo xitaa hadday u egtahay mid nool, laakiinse way dhimatay, waayo waxay kala go'een kan nolosha siiya.

Ilaah wuxuu Aadan uga digayey in **dembigu** isaga iyo Abuurahiisa **kala fogeynayo**, kan nolosha siiya. Waayo Ilaaha quduuska ee kaamilka ah dembigu hortiisa wax yar kama aha.

**Doorashada**

RABBIGA markuu naag quruxsan ka sameeyey Aadan feerihiisa kadib buu u keenay oona u sheegay inay nin iyo naagtiis yihiin, *"Oo Ilaah wuxuu arkay wax kasta oo uu sameeyey, oo bal eeg, **aad** bay **u wanaagsanaayeen**. …Oo labadooduba way qaawanaayeen, ninka iyo naagtiisuba, **mana** ay **xishoonaynin**."* (Bilowgii 1:31; 2:25) Bal ka fikir adduun kaamil ah oo kuwa deganna kaamil yihiin, iyagoo xariir kaamil ah la sameeynaya Abuurahooda. Saas bay ahayd bilowgii. Kaamil. **Laakiin maxaa khaldamay?**

Maalin Aadan iyo Xaawa waxay ag joogeen geedkii la mamnuucay, markaasaa Shayddaankii[4] ku imaaday qaabka abeesada. Oo wuxuu Xaawa ku yiri, *"**Ilaah miyuu idinku yidhi**, Waa inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?"* Shayddaanku wuxuu doonay inay ereyga Ilaah ka shakiyaan, markaasuu Xaawa ku yiri, *"**Ma dhiman doontaan**; waayo, Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan, oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta."* (Bilowgii 3:1,4-5) Bal eeg sida Shayddaanku iskugu darayo runta iyo beenta. Maahmaah Carabi ah ayaa dhahaysa, "Bal la socda khiyaanoolayaasha qaar runta way sheegaan!" Khaa'inka ugu wayn been buu sheegay, isagoo leh, *"Ma dhiman doontaan,"* oo runta buu sheegay, isagoo leh, *"Waxaad kala garan doontaa xumaan iyo wanaag."* Laakiin ma u sheegin cawaaqibka naxdinta leh ee dembigu keeni doono.

[4]Shayddaanku (kaasoo macnahiisu yahay *Cadow*) wuxuu ahaa malag jannada jooga, kaasoo jannada laga soo saaray, markuu isku dayey in malaa'igta kale isaga caabudaan beddelkii RABBIGA. Malaa'igta Shayddaan la caasisayna waxaa la dhahaa *ruuxaan xunxun*.

Waqti baa yimaaday oo Aadan iyo Xaawa ay kala doortaan hadalka Ilaah iyo kan Shayddaanka. Waxay doorteen kan dambe. *Way cuntay.* ***Isagana wuu cunay***.

*"**Oo** labadoodiiba indhahoodii way furmeen, oo waxay garteen inay qaawan yihiin;* ***waxayna isku tosheen caleemo berde, oo ay gunti ka samaysteen****.*

*Oo waxay maqleen codkii RABBIGA Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way* ***iska qariyeen*** *Ilaah, oo waxay ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda.*

*Oo RABBIGA Ilaah ahu wuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu ku yidhi,* ***Xaggee baad joogtaa?***

*Isagiina wuxuu yidhi, Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan* ***cabsaday****, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan* ***isqariyey****.* (Bilowgii 3:7-10)

Maxay ceebta iyo isqarinta u dareemeen?

Way dembaabeen.

Saaxiibtinimadii ay Abuurahooda la lahaayeen way dhammaatay.

Awoowayaasheenna jir ahaan way noolaayeen, laakiin xagga ruuxa way ka **dhinteen**.



## Ilaah Quduus Ah

Aadan iyo Xaawa intaysan dembaabin kahor, Ilaah ammaantiisa kaamilka ah baa iyaga la jirtay. **Raaxo** dhammaystiran bay ku haysteen agjoogga iftiinka badan leh ee Abuurahooda, kaasoo beerta imaanayey, si uu ula hadlo oo ula socdo iyaga. Laakiin markii ay caasiyeen amarkiisa waxay agjooggiisa ku dareemeen **raaxo la'aan**—ma ahayn inay qaawanyihiin darteeda, laakiinse xagga ruuxiga ay ka qaawanaayeen.

Intay dembaabin kahor, Aadan iyo Xaawa waxay ku socdeen **damiirka Ilaah** oo "*mana ay xishoonaynin*." (Bilowgii 2:25) Laakiin hadda waxay ku socdaan **damiirkooda** oo waxayna dareemeen inaysan nadiif ku ahayn Ilaah hortiisa.


Way ka duwanaadeen Abuurahooda, kaasoo ahaa **quduus**. Hadda waxay noqdeen kuwa aan **quduus ahayn**. Iyagu mar dambe mana doonaynin inay joogaan daahirnimada iyo dhalaalka agjoogga Ilaah. Sida baranbarooyinka ugu cararaan halka ay isku qariyaan marka nal lagu ifiyo, sidaas oo kale ayey hadda, *"dadkiise waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka, maxaa yeelay, shuqulladoodu shar bay ahaayeen."* (Yooxanaa 3:19)

Ilaah quduus ah oo kaamil ah, oo daahir ah uma dulqaadanayo dembi. Wayna ogaayeen. Adigu ma ogtahay?

Dembigu Ilaah hortiisa waa wax u xun sida bakhtiga doonfaarka oo gurigaaga kujira kula ahaan lahaa. "***Quduus, quduus, quduus*** *waxaa ah RABBIGA!"* (Nebi Ishacyaah 6:3)

Isla markii ay awoowayaasheen ugu horreeysay dembaabeen bay noqdeen sida laan geed ka jabtay. *Waxay kala go'een Ilaah,* Kan nolosha siiya. Sidoo kale sida laan geed ka jabtay buu *jirkoodu bilaabay inuu dhinto*. Laakiin ilaa Rabbiga Ilaaha ah uu ka badbaadiyo maahane, waxaa u sugnaanaysaa inay *Ilaah kala fogaadaan weligood oo ay ku baabba'aan "warta dabka ah*" (Muujintii 20:14-15), halka nafaha dembigu wasakheeyey weligood gooni loo dhigay oo aysan lahayn rajada ay ku baxsan lahaayeen. Aadan iyo Xaawa waxay noqdeen **dembiilayaal aan rajo lahayn**. Laakiin warka wuu sii xumaadaa.

Waayo Aadan wuxuu ahaa binu aadankii ugu horreeyey sidaas darteed dembigiisa wuxuu saameeyey **farcankiisa oo dhan**. Sida laan yar iyo caleen ku yaala laantii jabtay ay saameeysay, bay sidoo kale kuwa Aadan reerkiisa ka tirsanna saameeyeen. Kulligeenna waan wada dembaabnaa, waanna dhimannaa.



"*Haddaba sida dembigu **nin keliya** dunida **ugu** soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa **dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan**, waayo, **waa la wada dembaabay**.*" (Rooma 5:12)

**Dembigu** (maahan kansarka, abaarta, masaakiinnimada ama qaraxyada) waa xoog wax burburiya kaaso masiibo wayn ku ah dunida.

Dembigu wuxuu keenay **habaar**. Awoowayaasheennii ugu horreeysay iyo farcankooda waxay mari doonaan nolol adag, xanuun, qodaxyo, abaar, cudur, duqnimo, iyo dhimasho.



Badideenna waxaan u baranay dhibaatadaas oo kale, waana aqbalnaa inay "nolosha ay ka mid tahay camal." Laakiin soo la yaab ma aha in dhalitaanku wato xanuunkaas daran? Ama ubax duureed caraf badan inuu leeyahay qodaxyo? Ama kuwii laga abuuray Ilaah araggiisa inay dhintaan oo kadibna la xukumo?

Waxyaalahan la rabin dabiicii kuma ahan adduunkan sida unugyada kansarka ku dabiici ugu ahayn qofka caafimaadka qaba jirkiisa.

Warka wanaagsan waa in Abuuraheenna ilaa bilowgii uu lahaa qorshaha badbaadinta. Maalintii uu dembiga kharribay binu aadanka, Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa u sheegay wax yar oo ka mida qorshahiisa. Waqtiguu doorto ayuu RABBIGU dhulka usoo diri doonaa **Badbaadiye**, *naagta Farcankeeda* (Bilowgii 3:15), kaasoo jid u samayn doona farcanka Aadan iyo Xaawa oo ka badbaadin doona Shayddaanka, dembiga, dhimashada iyo naarta. Samatabbixiyahan waxaa loogu yeeri doonaa **Masiixa**, *Kan Ilaah doortay*.

Laakiin naxariistiisa iyo xaqnimadiisa darteed buu Ilaah wax cajiib ah ugu sameeyey kuwii Isaga ku caasiyey.

*"RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu Aadan iyo naagtiisii u sameeyey **dhar harag** ah, wuuna u **xidhay iyagii**.*" (Bilowgii 3:21)

Aadan iyo Xaawa waxay isku qariyeen caleemo, waxay isku dayeen inay dembigoodii iyo ceebtooda qariyaan. Laakiin Ilaah wuu ka diiday waxaas ay sameeyeen si iyaga loo aqbalo. Beddelkeed, Ilaah wuxuu qalay xayawaanno oo Aadan iyo Xaawa haraggoodii u xiray.

Waxaa murugo leh in xayawaan aan waxba galabsan la qalay Aadan iyo Xaawa dembigooda dartiis. Halkan Ilaah wuxuu tuusale ahaan ku tusaayey qorshahiisa oo ah in dembiileyaasha uu ka badbaadin doono *sharciga dembiga iyo dhimashada*. Dhiigdaadiska wuxuu tusayaa waxa loo baahan yahay si **dembiga** binu aadanka loo *cafiyo*; Haraggii wuxuu tusayaa waxa loo baahanyahay si **ceebta** binu aadanka loo *daboolo*. Waqtigaas ka bilaabato, wan ama xayawaan kale oola aqbalo baa dembigu si *kumeel gaar ah* loo bixinayaa. Ilaa laga gaaro waqti uu Ilaah keeni doono *beddelka joogto ah.*

Ilaah wuu bixiyey **allabarigii ugu horreeyey** ee dembiga.
Wuuna bixin doonaa **Allabariga Ugu Dambeeyo** ee dembiga.

## Cibaadada Dembiileyaasha

Haddaan raacno muujinta nimcada ah (taasoo ah *naxariista aan anagu istaahilin*), Ilaah Aadan iyo Xaawa wuxuu ka saaray beertii kaamilka ahayd, wuxuuna u diray dunida dembiga leh ee inkaaran. Dembigooda baa iyaga iyo Ilaah kala fogeeyey. Waalidkeenna ugu horreeyey dhibaato culus bay lahaayeen. Sidoo kale anagana waa sidaas.

Waqti kadib, Xaawa waxay dhashay cunugga adduunka ugu horreeyey, Qaabiil. Kan ku xigayna wuxuu ahaa Haabiil, walaalkiisa. Wiilashiina waxay qaateen dabeecadda dembiga leh ee waalidkooda. Sida maahmaahda Afrikaanka dhahayso:

- "Jiirku ma dhalaayo carruur aan meel qodaynin."
- "Balaayaduna kuma koobna kuwii marka horey sababay."

Qaabiil iyo Haabiil iyagoo weli dhallinyaro ah, baa waxay dooneen inay Abuurehooda caabudaan. Laakiin haddii ay xariir lahaan lahaayeen, wixii ay ahaan lahayd doonistiisa. "*Oo dhiigdaadin la'aan* (bixinta dhimashada) *dembi dhaaf ma jiro* (deynta dembiga)." (Cibraaniyada 9:22)

Qaabiil wuxuu Ilaah ku soo dhowaaday **jidkiisa**. Wuxuu Ilaah u bixiyey khudaaro uu soo xulay, taasoo isagu dadaalkiisu ku falay. Qaabiil wuxuu ahaa sida dadka maanta kuwaasoo isku dayaan inay eexshada Ilaah helaan, markay sameeyaan cibaadooyinka diimeed iyo shaqooyin fiican oo way iskaga indha tirayaan in dembigu uu waydiistaa *dhimashadu*, ma aha dadaal. Ilaah wuxuu diiday Qaabiil allabarigiisa. Dhinaca kalena Haabiil wuxuu Ilaah la hor yimaaday iimaan ku **Ilaah** ku lahaa. Haabiil wuxuu keenay wixii dhimashada loo bixin lahaa—dhiigga wan oo allabari ah.

Bal ka fikir Haabiil oo gacantiisa saaraya madaxa wanka eed la'aanta ah oona RABBIGA uga mahadceliyey, inkastoo Haabiil ku qasbanaa inuu dhinto oona weligiis ka fogaado Abuurahiisa, Ilaah wuxuu aqbalay wanka beddelkiisa. Wankii (aan lahayn deynta dembiga) beddelkiisii uu u dhintay.



Haabiil wuxuu aqbalay sharciga **dembiga iyo dhimashada**, taaso sababtay, "*RABBIGUNA wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii; laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin*." (Bilowgii 4:4-5)

Laakiinse Qaabiil si qaldan Ilaah ku hor imaaday, Ilaah weli wuu jeclaa isaga oo wuxuu ku boorriyey inuu toobadkeeno, taasoo ah *inuu qalbigiisa beddelo* oo jidka Ilaah isu dhiibo, taaso ah cafiska dembiga iyo xaqnimada. Laakiin Qaabiil wuu diiday inuu keeno dhiiggii wanka dembigiisa bixin lahaa. Beddelkii, xanaaqiisa iyo kibirkiisa diimeed ayuu ku tagay oo dilay Haabiil oo Ilaahna ku caasiyey.

Qorniinnadu way noo sheegayaan in Aadan iyo Xaawa ay "*heleen wiilal iyo gabdho kale*." (Bilowgii 5:4) Qaar baa doortay inay Ilaah aamminaan oo ay addeecaan, laakiin badidoodana waxay doorteen inay jidka Qaabiil raacaan.

**In Iimaan lagu qabo Ilaah & Qorshahiisa**

Toban qarni oo dhaadheer Aadan kadib, Ilaah wuxuu bixiyey warbixin murugo leh oo ku saabsan reerka aadanaha. "… ***shareysan*** *mar walba*." (Bilowgii 6:5) Dulqaad badan kadib, Ilaah wuxuu shartii ku xukumay daad, wuxuu badbaadiyey oo keliya awoowgeenna Nuux iyo reerkiisa, kuwaasoo aamminsanaa RABBIGA iyo qorshahiisa. Ilaah wuxuu kaloo badbaadiyey labo ka mid ah nooc kasta oo xayawaan ah iyo toddobo lamaane oo xayawaanno ku fiican allabaryada dembiga. Waa maxay wuxuu Nuux sameeyey, markuu daadka dhammaaday? "*Nuuxna meel allabari buu RABBIGA u dhisay; xayawaankii daahirka ahaa iyo haaddii daahirka ahaydba, intuu wax ka qaatay, ayuu allabaryo la gubo ku bixiyey meeshii allabariga dusheeda*." (Bilowgii 8:20)

Xitaa markii bilow cusub la siiyey, in yar kadibna dadkii Abuurehooda bay ku caasiyeen. Toban qarni Nuux ka dib, Ilaah wuxuu u yeeray Ibraahim inuu guriga aabbihiis iyo diintiisa kasoo tago oo uu iimaankiisa (kalsoonida, aamminaadda) Isaga keliya saaro. Qorniinku wuxuu dhahaa, "'*Ibraahimna* ***Ilaah*** *buu* ***rumaystay****, oo waxaa* ***isaga loogu tiriyey xaqnimo****,' oo waxaa loogu yeedhay saaxiibkii Ilaah*." (Yacquub 2:23; Bilowgii 15:6) Ilaah muxuu u caddeeyey Ibraahim inuu yahay kan xaqa ah? Waayo Ibraahim RABBIGA iyo ereygiisa buu aamminay.

Ilaah wuxuu Ibraahim ku yiri, "*Oo* ***quruun wayn*** *baan kaa dhigi doonaa…oo* ***qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan***." (Bilowgii 12:2-3) Ilaah wuu xajiyey ballantiisii. Nebiyada, Qorniinnada iyo Masiixu iyaga oo dhan waxay ka yimaadeen quruuntaas.

Ibraahim goortii uu aad u duqoobay, RABBIGA wuxuu waydiiyey isaga inuu sameeyo wax adag. Wuxuu u sheegay inuu tago buur gaar ah oo halkaasna ka dhiso meel allabari ah oo wiilkiisa bixiyo! Ibraahim wuu ogaa in Ilaah uu yahay kan xaqa ah, oo fiican, oo lagu kalsoonaan karo, sidaa darteed wuu addeecay.

Saddex maalmood kadib, markay aabbaha iyo wiilka buurta fuuleen, Ibraahim wiilkiisa ayaa waydiiyey su'aal macquul ah, oona yiri, "*Aabbow…**meeh wankii** allabariga la gubo loo bixin lahaa?" Ibraahimna wuxuu yidhi, '**Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii** allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow*.'" (Bilowgii 22:7-8)


Waa laga yaabaa inaad sheekada garanaysid. Ilaah wuu soo dhex galay oo Ibraahim siiyey wan geesa leh (ma aha *"wanka"*) in la dilo "***meeshii wiilkiisa***". *Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey **RABBIGA Ayaa Lagu Arki Doonaa.** Xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, 'Buurta RABBIGA ayaa lagu arki doonaa.'"* (Bilowgii 22:13-14) Markuu buurta u bixiyey "*Rabbiga Ayaa Lagu Arki **Doonaa***", beddelkii "Rabbiga Ayaa Lagu *Arkay*", Ibraahim wuxuu sii sheegayey maalinta qiimaha leh markii Masiixu "***Wanka Ilaah***," dhiiggiisa isla buurtaas ku daadin doonna sida allabariga dembiga ee ugu dambayso, maahan inuu furto hal qof, laakiin inuu siiyo madaxfurasho buuxdo adduunkoo dhan, si "***midkastoo** isaga **rumaystaa** uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah*." (Yooxanaa 1:29; 3:16)



## Tobanka Amar

Ilaah ballantiisa Ibraahim ka qaaday wuu xajiyey, markuu ka dhigay farcankiisa "*quruun wayn*"— wayn, maahan *cabbir*, laakiinse *muhiimad* ahaan. Ilaah wuxuu ugu talaggalay inuu quruuntan isticmaalo, si uu quruumo kale u baro siduu yahay, iyo sida uu dembiileyaasha u aqbali doono. Waqtigii Muuse Ilaah wuxuu dadka siiyey tobanka amar (Baxniintii 20), isagoo leh, *"Inkaaru ha ku dhacdo ku kasta oo aan adkayn sharcigan ereyadiisa inuu sameeyo*." (Sharciga Ku noqoshadiisa 27:26)

Dembigu binu aadanka iyo Ilaah buu kala fogeeyey. RABBIGA oo quduus ah, wuxuu u baahanyahay addeecid kaamil ah oo aan dhammaanayn. *"Ku alla kii sharciga oo dhan xajiya oo **qaynuun keliya** ku gafa, **kulli** wuu ku eedaysan yahay*." (Yacquub 2:10)




Si kasta aad u malaysid inaad fiican tahay, weligaa kuma noolaan kartid heerka kaamilka ee Ilaah. Sida *muraayad* markad iska dhex fiirisid ay ku tusayso wasakhda wejigaaga ku taala, laakiin ma dhaqi karto, sidaas oo kale baa Ilaah sharcigiisa kaaga tusayaa dembiga qalbigaaga, laakiin kama saari karo. Tobanka amar waxay na baraan inaan **dembiile rajo la'aan** nahay oo aan weliba u baahanahay **Badbaadiye**.

Maadaama quruuntoo dhan ay dembi gashay, jabinta sharcigiisa darteed, Ilaah wuxuu amray Muuse oo ku yiri, "*meel allabari waa inaad…samaysaa, oo waa inaad dusheeda iigu bixisaa qurbaannadaada la gubo*." (Baxniintii 20:24) ***Sharciga allabariga*** keliya ayaa baabbi'inaya ***sharciga dembiga iyo dhimashada***. Waxay ahayd allabariga xayawaanka aan iin lahayn oo Ilaah ku ciqaabay dembiga, isagoo aan ciqaabin dembilaha. Caabudayaashu waa inay doortaan dibi, orgi, wan ama shimbir caafimaad qabaa. Waxay muujiyeen iimaankooda ay ku lahaayeen Ilaah iyo jidkiisa xaqa ah iyo naxariista, markay gacantooda saareen xayawaanka madaxiisa. Ilaah hortiisa dembiyadoodu waxay ku wareejiyeen xayawaanka, kaasoo beddelkooda la dili doona.



"***Waayo, jidhka noloshiisii waxay ku dhex jirtaa dhiigga****; oo anna waxaan meesha allabariga dusheeda idiinku siiyey in nafihiinna loogu* ***kafaaro gudo****, waayo, waa* ***dhiigga*** *waxa loogu* ***kafaaro gudaa*** *nolosha daraaddeed.*" (Laawiyiintii 17:11, Tawreedda)

**Madaxfurashada macnaheedu waa** *daboolidda***. Dhiiggii xayawaankii aan dembiga lahayn dembi buu** *daboolaa***, laakiin dembiga ma** *saari* **karo.** "*Waayo, ma suurtowdo in dibiyo iyo orgiyo dhiiggoodu dembiyo qaado*." (Cibraaniyada 10:4) Xayawaannadu Ilaah araggiisa laga ma sameeynin. "*Wanka*" aan dembi lahayn ee Ilaah ballanqaaday keliya (Ishacyaah 53:7) ayaa dembiga iyo deynta ka saari karaa weligiis.

**Waxyiyo kale**

Waqtigii nebi Muuse kaddib, Ilaah wuxuu doortay oona u waxyooday nebiyo kale oo badan inay wax sii sheegaan, iyagoo faahfaahin dheeraad ah sii sheegaya, imaanshaha Masiixa oo *"dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbaadin doonaa."* (Matayos 1:21) Halkaan waxaa ku yaala waxyi ee tusaalaha.

"**Gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta***, oo waxay dhali doontaa wiil, oo magiciisana waxay u bixin doontaa Cimmaanuu'eel."* (*Cimmaanuu'eel* macnahiisu yahay **'Ilaah baa nala joogaa**.') — Ishacyaah 7:14 (700 dhalashadii Ciise Ka Hor)

"**Beytlaxam***…waxaa adiga iiga kaa soo bixi doona mid…***kaasoo bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis***."*— Miikaah 5:2 (700 dhalashadii Ciise Ka Hor)

"**Ilaahiinnu wuu iman doonaa, wuuna idin badbaadin doonaa***. Oo markaasaa kuwa* **indhaha la'** *indhahoodu furmi doonaan, oo kuwa* **dhegaha la'** *dhegahooda furka laga bixin doonaa. Oo markaasaa* **ninkii curyaan ahu** *wuxuu u boodboodi doonaa sida deerada oo kale, oo kii* **carrab la'** *carrabkiisuna wuu gabyi doonaa."* — Ishacyaah 35:4-6 (700 dhalashadii Ciise Ka Hor)

*"Oo waxay* **iga mudeen gacmaha iyo cagaha***."* — Daa'uud, Sabuurradii 22:16 (1000 dhalashadii Ciise Ka Hor)

*"Isaga sidii* **wan** *la qalayo baa loo kexeeyey…***Waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna**.*"* — Ishacyaah 53:7,5 (700 dhalashadii Ciise Ka Hor)

Kumanaan sanoo isdiyaarin ah kadib baa waqtiga Ilaah la gaaray oo uu dunida usoo diri lahaa Masiixa. Laakiin *yuu* noqon doonaa? Oo *siduu* u imaan doonaa? Sida ay nebiyadu horey u waxyoodeen, wuxuu ka dhalan doonaa gabar bikrad ah farcankii Ibraahim iyo Boqor Daa'uud. Badbaadiyaha dembileyaasha saas baa lagu heli doonaa, si uu u dhaxlin dembiga Aadan. Wuxuu noqon doonaa farcanka gaarka ah ee naag.

"*Ilaah baa malaa'ig Jibriil u soo diray magaalada Galili oo Naasared la odhan jiray ilaa gabadh bikrad ah oo u doonanayd nin la odhan jiray Yuusuf oo dhashii Daa'uud ahaa; gabadhana waxaa la odhan jiray Maryan….*

*Malaa'igtii waxay ku tidhi, 'Ha baqin, Maryamay, waayo, nimco ayaad Ilaah ka heshay. Waad uuraysan doontaa, oo wiil baad umuli doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa* ***Ciise****. Nin wayn buu ahaan doonaa, waxaana loogu yeedhi doonaa* ***Wiilka Kan ugu sarreeya****.'*

*Maryan waxay malaa'igtii ku tidhi, 'Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan maayo.'*

*Malaa'igtii waa u jawaabtay oo ku tidhi, '****Ruuxa Quduuska ah*** *ayaa kugu soo degi doona, oo* ***xooggii Kan ugu sarreeya*** *ayaa hoosiis kuu noqon doona, sidaa darteed* ***kan quduuska ah*** *oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeeri doonaa* ***Wiilka Ilaah****. …* ***Waayo, wax aan Ilaah kari doonin ma jiro****.'*" (Injiilka sida Luukos[5] u qoray 1:26-37)

[5]Qaybtii labaad ee kitaabkiisa (Axdiga Cusub), Ilaah wuxuu waxyi siiyey Matayos, Markos, Luukos iyo Yooxanaa inay ka qoraan warka wanaagsan ee ku saabsan Ciise. Ilaaha waaxidka ah ee runta ah mar walbana runtiisu wuxuu ku caddeeyaa markhaatiyaal badan.

## Wiilka Ilaah

Masiixa magaciisu waa ***Ciise,*** kaasoo macnahiisu yahay *RABBIGA Wuu Badbaadiyaa*. Waa maxay magacyada lagu yeeri doono? Bal aan haddana dhegaysano wuxuu Jibriil ku yiri Maryan: "*Sidaa darteed kan quduuska ah oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeeri doonaa* ***Wiilka Ilaah***."

Ilaah wuxuu doonayaa in qof walboo ee quruun kasta uu aammino Ciise inuu yahay ***Wiilkiisa***. Laakiin badankood baa diiday inay saas sameeyaan. Badan waxay u maleeyaan magaca "*Wiilka Ilaah*" ay macnaynaysa inuu Ilaah naag qaatay oo cunug ka dhalay. Tani maahan waxa Baybalka baraya.

Sanadkii 1984, nin shacabka Senegaal ah oo aad loo yaqaanay baa shil gaari ku dhintay. Wargeyska quruunta baa ammaan ka qoray ninkii Muslimka oo yiraahday "wiilka wayn ee Senegaal." Ereyadan macnahoodu miyuu yahay dalka Senegaal naag buu qaatay kadibna wiil buu ka dhalay? Saas maahan! Dadka Muslimka ee Senegaal dhib kama qabaan inay qaddariyaan nin shacab ah oo aad loo jeclaaday inay magacan ku isticmaalaan. Way fahmaan waxay muujinayso markay dhahaan "wiilka Senegaal" oona macnaynayso. Sidoo kalana way garanayaan waxay *macnaynaynin*.

Sidoo kala Ilaaha Qaadirka Ah markuu Masiixa ugu yeeray ***Wiilkiisa*** waa inaan ogaanaa wuxuu ka wado iyo *wuxuusan* ka wadin. Bal yaanan ku jeesjeesin magaca iyo shuruudaha uu Abuuraheenna wayneeyey.



Qorniinnada dhexdooda, Masiixu wuxuu leeyahay magacyo 300 ka badan. Magac walba wuxuu siiyaa aragti cusub oo ah qofkuu yahay iyo wuxuu u yimid. Tusaale ahaan, magaciisa "*Wiilka Ilaah*" wuxuu noo sheegayaa *waynaantiisa,* kaasoo ka yimid samada. Laakiin sidoo kale waxaa loogu yeeraa "*Wiilka Aadanaha*," kaasoo noo sheegaya *is-hoosaysiintiisa,* kaasoo doortay inuu ku dhasho bulshada binu aadanka ee dembiga qabta.

"*Waayo, **Wiilka Aadanahu** uma iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa dad badan furashadooda u bixiyo. …**Ninna ma leh jacayl kan ka wayn** inuu nin naftiisa u bixiyo saaxiibbadiis.*" (Markos 10:45; Yooxanaa 15:13)

Sida *Wiilka Ilaah* gacmahiisuu saaraa waxyaalaha Ilaahnimada, laakiin sida *Wiilka Aadanahu* gacantiisuu saaraa waxyaalaha dadnimada. Masiixu waa kan keliya "*Dhexdhexaadiye oo u dhexeeya Ilaah iyo dadka*" (1 Timoteyos 2:5), kaasoo ka qanciya Ilaah dalabkiisa xaqa ah iyo naxariistii binu aadanka u baahanyihiin.

Kuwii isaga u qaatay "inuu ka hooseeya waynaantii Ilaah" inuu noqday binu aadanka waxay iska indhatirayaan dabeecaddiisa iyo qorshahiisa. Abuurahaaga, kaasoo u qaadanin "inuu ka hooseeya waynaantiisa" inuu la socdo oo la hadlo Aadan iyo Xaawa, kaasoo doortay inuu ku hoos noolaado awoowayaasheenna ee dembaabay inuu ka badbaadiyo iyaga—iyo aniga iyo adiga—Shayddaanka, dembiga iyo dhimashada. ***"Ilaah waa jacayl."*** (1 Yooxanaa 4:8)

**Badbaadiyaha**


Sida ay nebiyadu horey u soo waxyoodeen, Masiixu wuxuu ku dhalan doonaa Beytlaxam. Laakiin Maryan waxay ku noolayd Naasared. Tani wax dhibaato ah u ma keenin Ilaah. Waqtiga saxda ah baa boqorka Rooma amar ku bixiyey, isagoo raba in dadkii oo dhan ay u laabtaan magaaladoodii ay ku dhasheen in la tirakoobo. Sidaas baa Maryan iyo Yuusuf u safreen koonfurta Beytlaxam.



*"Waxaa dhacay kolkay halkaas joogeen in maalmihii ay umuli lahayd dhammaadeen, waxayna umushay **wiilkeedii curadka ahaa**, markaasay maro ku duudduubtay oo qabaal ku jiifisay, waayo, meel ay ku hoydaan ayey hudheelkii ka waayeen.*

*Dalkaas waxaa jiray adhijirro bannaanka jooga oo habeenkii idahooda ilaalinaya. Malaa'igtii Rabbiga ayaa ag istaagtay, oo ammaanta Rabbiga ayaa iftiimisay hareerahooda, aad bayna u baqeen. Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, 'Ha baqina, waayo, ogaada, waxaan idiin keenay **war wanaagsan oo leh farxad wayn oo u ahaan dadka oo dhan**. Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud **idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah**!' Dhaqsoba waxaa malaa'igtii la jirtay guuto fara badan oo jannada ka timid, wayna ammaanayeen Ilaah oo lahaayeen, 'Ilaah ha ku ammaanmo meelaha ugu sarreeya, Xagga dhulkana nabad ha ahaato dadka… dhexdooda.'"* (Luukos 2:6-11,13-14)

Haddaba yaa waayey cunuggan lagu dhalay moorada oo malaa'igtuna ogaysiis ka bixiyeen? Haddaba maqal hadalkii malaa'igtu ku tiraahday arijirka, "*Isagu waa Masiixa **Rabbiga ah***!"[6]



"*Bilowgii waxaa jiray Ereyga,*[7] *Ereyguna wuxuu la jiray Ilaah, **Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah**. Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa… Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka. Nuurkuna wuxuu ka ifayaa gudcurka, gudcurkuna kama badin. … **Ereyguna jidh buu noqday**, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa.*" (Yooxanaa 1:1-5,14)

Qofka keliya oo aabbe aadane ah la'aan la dhalay waa Ereyga oo keliya, kaasoo adduunkoo dhan laga sameeyey. Waa farcankii naag uu Ilaah ballanqaaday isla maalintii dembigu binu aadanka galay. Isagu waa "Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya!" (Nebi Yooxanaa [Yahya]; Yooxanaa 1:29)

[6]*Kiristos* af Gariigga wuxuu yahay *Masiixa*, kaasoo macnahiisu yahay *Kan La Subkay*. Haa, *Rabbiga* macnahiisu waa *RABBIGA*!

[7]In kastoo Qur'aanku Ciise ugu yeero *Ereyga Ilaah* (Af Carabi: *Kalimat Allah*; Suuradda 3:45; 4:171), xitaa wuxuu magacan siinayaa micna kala duwan. Sidoo kale Qur'aanku wuxuu Ciise ugu yeera *Masiixa* iyo *Ruuxa Ilaah* (Suuradda 4:171)




Sida uu Shayddaanku Aadan u jirrabay, sidaas oo kale wuu isku dayey inuu Ciise dembi galiyo. Laakiin, si ka duwan Aadan, Ciise ma isku dhiibin Shayddaanka. Yaraantiisa ilaa waynaantiisa Rabbiga Ciise wuu addeecay tobanka amar iyo sharciga Ilaahna si kaamil ah buu u dhowray—gudaha iyo bannaankaba. Isagu waa "*loo jirrabay sideenna oo kale, oo aan weliba **dembi lahayn***." (Cibraaniyada 4:15) Maadaama uusan dembi lahayn, ma istaahilin inuu dhinto. Laakiin ulajeeddadaas buu u yimaaday.

Markuu Ciise jiray soddon sano, wuxuu bilaabay inuu ku safro magaaladiisa Naasared bannaankeeda, isagoo wax baraya oona wacdinaya, oo u yeeraya niman iyo naago inay Isaga raacaan. Wuxuu dadka ka saarayey ruuxaan xunxun, oo kuwa dhintayna soo sarakicinaayey, oo kuwa dhagool ahna maqalkooda u soo celinayey iyo kuwii indhoola ahaana aragguu usoo celiyey. Ciise wuxuu sameeynaayey mucjiso, si ay dadku u ogaadaan qofkuu yahay oo ay u aamminaan. Yaa Ilaah mooyaane oo 5000 qof oo gaajaysan qadadii wiilka ku quudin karaa? Ciise baa sameeyey. Yaa Ilaah mooyaane duufaanta dejin karaa? Ciise baa sameeyey.

Ciise wuxuu caafiyey cudurro walboo kala duwan. Waxyaalahaas mana ku sameeynin daawo ama sixir. Hadal keliya ayuu ku sameeyey. Maadaama uu yahay *Ereyga* kan adduunkoo dhan isaga laga sameeyey, sidaas darteed qayb kastoo adduunkanna amarkiisay ku hoos jiraan. Si kastaba uu Masiixu shaqadiisu ay ahayn inuu dadka dhibkoodu jir ahaan u xalliyo, laakiin wuxuu u keenay inay xariir sax ah la yeeshaan Ilaah.

"*Kolkaasay waxay u keeneen nin curyaan ah oo sariir ku jiifa. Ciise oo rumaysadkooda arka ayaa ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, '**Wiilkow, kalsoonow, dembiyadaadu waa kaa cafiyan yihiin**.'*

*Kolkaasaa qaar culimmada ah waxay isku yidhaahdeen, 'Ninkan waa caytamayaa.' Ciise oo **fikirradooda garanaya** ayaa ku yidhi, 'Maxaad haddaba shar ugu fikiraysaan qalbiyadiinna? Iyamaa hawl yar, in la yidhaahdo, "Dembiyadaadu waa cafiyan yihiin", ama in la yidhaahdo, "Kac oo soco"? Laakiin **si aad ku garataan in Wiilka Aadanahu dhulka ku leeyahay amar uu dembiyada ku cafiyo**…'*


*Markaasuu kii curyaanka ahaa ku yidhi, '**Kac oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag.**' **Markaasuu kacay oo gurigiisii tegey**. Laakiin dadkii badnaa goortay arkeen, way baqeen.* (Matayos 9:2-8)

Qof weligiis sida Ciise u hadlay malahan. Tusaale ahaan, wuxuu baray, "*Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee.*" (Yooxanaa 14:6) Ciise wuu ka duwan yahay hoggaamiyeyaashii diinta ee dhahaya, "Waxan sameey! Waxan ha sameeynin! Raaca xeerarkan. Tani waa jidka!" Ciise keliya ayaa dhahi karay, "***ANIGU WAXAAN AHAY** Jidka*." Ciise keliya ayaa dhahi karay, "***ANIGU WAXAAN AHAY** sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa*," kadibna meyd afar maalmood duugsanaa noloshu kusoo celiyey (Yooxanaa 11:25) Shaqadiisa baa caddaynaysa hadalladiisu inay run yihiin.

**Nuurka**

Ciise sidoo kale wuxuu yiri, "***Anigu waxaan ahay nuurka dunida***. *Kii i soo raacaa, gudcurka kuma socon doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka nolosha*." (Yooxanaa 8:12)

Nebiyadu waxay ahaayeen sida bisha oo kale, oo ay iftiinka Ilaah xoogaa u ifiyaan adduunkan mugdiga ah. Laakiin Qorniinnadu nebiyada Masiixu waxaa lagu yeeray, "***qorraxdii*** *xaqnimada*" iyo "*tan **qorraxda** soo baxda*" (Nebi Malaakii 4:2; Nebi Sakariyas, Luukos 1:78) Ciise waa "***nuurka*** *dunida,*" kan ay iftiinku iyo noloshu ka yimaadaan. Isla ammaantii oo muday mugdiga maalintii ugu horreeysay ee abuurka waxaa lagu dhex qariyey Ciise! Wuxuu u yimaaday inuu naga saaro mugdiga dembiga oo anagu noogu soo celiyo Ilaah.



Wax yar ka hor intuu Ciise isagoo raalli ah noloshiisu bixinin, wuxuu doortay saddex markhaatiyaal, "*oo wuxuu keligood geeyey buur dheer…Hortoodana ayuu ku beddelmay, wejigiisuna sida qorraxda oo kale ayuu u dhalaalay, dharkiisuna sida nuurka oo kale ayuu u caddaaday… oo cod baa daruurtii ka soo baxay oo yidhi, '**Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay. Maqla isaga***!" (Matayos 17:1-2,5)


Ciise wuxuu ahaa Kan keliya oo si fiican u ogaa:
goortuu dhiman doono,
halkuu ku dhiman doono,
siduu u dhiman doono,
iyo wuxuu u dhiman doono.

Sida uu waqtigu u soo dhowaaday inuu silaca maro oona u dhinto dembiga dunidoo dhan, kaasoo la soo dhaafay, kan hadda ah iyo kan soo socdo, Ciise wuxuu xertiisa ku yiri, "*Waxaynu ku soconnaa Yeruusaalem, oo **wax walba oo nebiyadu qoreen ayaa Wiilka Aadanaha u noqon doona**. Waayo, isaga waxaa loo dhiibi doonaa dadka aan Yuhuudda ahayn, waana lagu kajami doonaa, oo la caayi doonaa, oo lagu tufi doonaa, wayna karbaashi doonaan oo **dili doonaan**, **maalinta saddexaadna wuu soo sara kici doonaa**.*" (Luukos 18:31-33)

Hoggaamiyeyaashii diimeed waxay naceen Ciise, maxaa yeelay "*wuxuu iska dhigay Wiilka Ilaah*." (Yooxanaa 19:7) Laakiin waxa iyaga sii dhibay waxay ahayd dadku Ciise bay warkiisay dhegaysanayaan beddelkii ay iyagu dhegaysan lahaayeen! Sidaas darteed waxay qorshaysteen inay Isaga dilaan, iyagoon ogayn inay oofinayeen Qorniinnadu nebiyada: in Masiixu "*Isaga waa la quudhsaday, waana la diiday*", kadibna "*sidii wan la qalayo baa loo kexeeyey*." (Ishacyaah 53:3,7)

**Allabarigii Ugu Dambeeyey**

Kadibna Rabbiga Ciise wuu isu oggolaaday in la qabto oo la xukumo, lagu jeesjeeso, taajka qodaxyo leh loo xiro, la garaaco, dharka laga siibo, kadibna lagu qodbo iskutallaab alwaax ah oo isla buurtii, iyadoo 2000 sano kasoo wareegatay, halkii oo Ibraahim ku waxyooday, isagoo leh, "***Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa***." (Bilowgii 22:8) Ilaah wuu daayey wiilka Ibraahim, laakiin Isaga "*aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan.*" (Rooma 8:32)



Ibraahim waxyigiisa wuu oofiyey. *Ilaah wuu bixiyey* ***Wanka****—Beddelkii Kaamilka ah*. Sida uu Ciise ciqaabta qaatay, taasoo adigu iyo anigu istaahilno, Ilaah samada joogo dunida buu ku daboolay mugdiga. Ciise isagoo raalli ah ayuu qaaday dembigeenna iyo ceebteenna. Rabbiga Ciise oo dembi aan lahayn baa Ilaah u ciqaabay dembiga, si aan anagu ka xoroobno *sharciga dembiga iyo dhimashada*. Kan aan dhammaad lahayn ayuu u adkaystay naarteenna waqtiga gudidiisa ah, si aan u baahnayn inaan u adkaysano weligeed. Intuu dhimanin ka hor, wuxuu guul ahaan ugu qayliyey, "***Waa dhammaatay!***" (Yooxanaa 19:30)


Ciise si ***dhammaystiran*** buu deyntii dembiga dunida ***u bixiyey***! Mana loo baahno allabaryo dembiga darteed loo bixinaya ama la aqbalaya. Sida oo Ibraahim wankiisa geesaha mid u dhintay, baa Wanka Ilaahna u dhintay dadkoo dhan.



Ciise wuu dhintay. Jirkiisa dulduleela waxaa laga dajiyey iskutallaabta, oo waxaa lagu duudduubay maro nadiif ah, kadibna waxaa la dhex seexiyey xabaal qabow. Albaabkii dhagaxa ahaa ee culusaana waa la xiray. Kadibna waxaa la gaaray maalintii saddexaad.

Maalintii Axadda, intuusan waagu baryin, dhowr naagood oo ahaayeen xertii daacadda ahayd ee Ciise baa yimaadeen dhinaca xabaalaha. Waxay arkeen dhagaxii oo albaabka laga saaray iyo xabaashii oo eberka ah!
Maradii lagu duugay keliya ayaa halkaas ku hartay.

*Malaa'igtii ayaa u jawaabtay oo naagihii ku tidhi, "Ha baqina, waayo, waxaan ogahay inaad doonaysaan Ciise, kan iskutallaabta lagu qodbay.* ***Halkan ma joogo, waayo, wuu sara kacay, siduu yidhi****. Bal kaalaya oo arka meeshii Rabbigu jiifay. Dhaqso u taga, oo waxaad xertiisii ku tidhaahdaan,* ***Kuwii dhintay ayuu ka soo sara kacay****, oo wuu idin hor marayaa ilaa Galili. Halkaasna waad ku arki doontaan*." (Matayos 28:5-7)



Naagihii intay ordaayeen oo ay dadka u soo sheegayeen bay Ciise la kulmeen oo, "*intay cagihiisa qabteen ayey caabudeen*." (Matayos 28:9)

**Dhimashada Oo Laga Adkaaday**

Ciise wuxuu sameeyey waxyaalihii oo awoowyaasheenna ay sameeyn waayeen. *Wuxuu ka adkaaday Shayddaanka, dembiga iyo dhimashada!* Ciise wuxuu yiri waxa aan nebiyada ay dhihi waayeen, "*Anigu waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, iyo* ***kan nool****. Anigu waan dhintay, oo bal eeg, waan noolahay tan iyo weligayba, oo waxaan haystaa furayaasha dhimashada iyo Haadees* (dunida ee kuwii dhiintay)." (Muujintii 1:17-18) Waayo Ciise wuu ka adkaaday dhimashada, kuwii Isaga aamminaan cabsi ku malahan noloshan iyo tan soo socotaba.

Sarakiciddiisa kadib, Ciise 40 maalmood buu la joogay xertiisa. Wuxuu ka caawiyey oona fahansiiyey Qorniinnada, isagoo tusaaya in nebiyadu (Ibraahim, Muuse, Daa'uud iwm.) ay sii sheegeen in Masiixu uu dhiman doono, oo noloshu kusoo laaban doono. Wuxuu kaloo ballanqaaday inuu Ruuxiisa Quduuska ah soo diri doono si ay uga dhex noolaato, oo ay iyagu dabeecaddooda ku beddesho tan Ciise, oo ay awood siiso, si ay warkiisa wanaagsan quruun kaste ka wacdiyaan. Dhamman kuwa toobadkeena (oo fikraddiisa iyo jidkiisa beddela) oo Ilaah Wankiisa Kaamilka ah aamminaa, kaasoo u dhintay meeshooda oo dhimashada ka adkaaday, waa la cafin doonaa, oo xaq ah loogu yeeri doonaa oo waxaa la keenay xariir lala yeesho Ilaah.



Maalintii afartanaad, xertiisi iyadoo ay fiirinayeen, Ciise wuxuu kor u kacay daruuraha xagga guriga Aabbihiis, isagoo ballanqaaday inuu soo noqon doono waqtiga la sii sheegay sida Xaakinka dunida oo dhan. Laakiin taasi waa sheeko kale!

Safarkan waxaan ku bilaabnay inaan magaca awoowayaashaada ee mar horey dhintay ku waydiinay. Xitaa haddaad garanaysid ama aadan garanaynin magacyadooda ma qiimo badna. Laakiin waxaa jiraa magaca Ilaah sheegay inuu yahay kan aan xad lahayn oo qiima leh; magaca oo noloshaada beddelo hadda iyo nolosha weligeed ahna.

Magacu waa ***Ciise***—magacu macnihiisu yahay *RABBIGA wuu badbaadiyaa.*

*"**Isaga nebiyada oo dhan** ayaa u markhaati fura in mid kastoo isaga rumaystaa uu **magiciisa ku** helo dembidhaafka. … **in magaca Ciise Masiix** … Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay, **ma jiro magac kale** samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno."* (Falimaha Rasuullada 10:43; 4:10,12)

"*Waxyaalahan waxaan idiinku soo qoray, idinka oo rumaystay **magaca Wiilka Ilaah**, si aad u **ogaataan** inaad nolosha weligeed ah leedihiin*." (1 Yooxanaa 5:13)

Haa, waad **ogaan** kartaa meesha aad joogi doontid weligeed ah! Abuurahaaga wuxuu kuugu yeeray inaad Isaga aammintid; inaad oggolaatid *Sheekadiisu* inay kacaan qaado *sheekadaada*. Haddii aad iimaankaaga *kasoo* wareejisid nafsadaada iyo diintaada oo aad *saartid* Rabbiga Ciise Masiix iyo wixii uu kuu sameeyey dhimashadiisa iyo sarakiciddiisa, marka Isagu shaqsi ahaan buu kuugu dhahaya, "*Runtii, runtii, waxaan **idinku** leeyahay, Kii ereygayga **maqla** oo **rumaysta** kii i soo diray, wuxuu **leeyahay nolosha weligeed ah**, **xukunna geli maayo**, laakiin **dhimashadii** ayuu **ka** soo gudbay oo **nolosha u** soo gudbay*." (Yooxanaa 5:24)

Aadan iyo Xaawa markay Abuurahooda ku caasiyeen, waxay isku keeneen laba dhibaato, taasoo ah tan **dembiga iyo ceebta.**

- **Dembigood** baa ku sababay inay isqariyaan.
- **Ceebtood** baa ku sababtay inay qaawanaantooda dabooshaan.

*Xaqnimadiis darteed* baa Ilaah ka diiday caleentay sameeysteen oo ay isku qariyeen, laakiin *naxariistiis darteed* buu Ilaah dharka haragga ah xayawaan u bixiyey u xiray. Dhiiggii xayawaanka wuxuu tusayaa waxa loo baahanyahay ee **dembigooda** lagu dhaqaa, haragga xayawaankana wuxuu tusayaa waxa loo baahnaa in **ceebtooda** lagu daboolo.



Waxaan wadaagnay dembiga iyo ceebta awoowayaasheenna. Sida dembiilayaashu waxaan u waaynay Ilaah heerarkiisa ee xaqnimada, ceeb darteed baan ugu qalmi waaynay inaan ku noolaano joogitankiisa quduuska ah. Waxaan u baahan nahay inaan helno cafiskiisa iyo kaamil ahaanshadiisa. Laakiin sidee baan ku heli karnaa?

- Sidee baa **dembiga** lagu nadiifin karaa, kaasoo ku kala fogeeyey adiga iyo Abuurahaaga xaqa ah iyo **kaamilka ah?**

- Sidee baa Ilaah kuugu yeeri karaa kan xaqa ah, si aad **ceeb** la'aan joogitaankiisa ugu noolaatid weligaa?

Iskutallaabta korkeed ayuu Ciise ugu silcay **dembigaaga** dartiis oo uu u adkaystay **ceebtaada**. Maadaama uu dembi lahayn, dhimashadu way ku hayn waayday xabaasha. Dhimashadiisa iyo sarakiciddiisa dartooda buu hadda kaaga codsanaya inuu ku *nadiifiyo* oo *ku asturo*, oo *dembiyadaadu* ku beddelo *xaqnimadiisa*. Laakiin waa inaad aammintid diiwaanka Ilaah ee qoran. Miyaad aamminsan tahay?

*Bal yaa warkayagii* ***rumaystay****? … waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna… Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waluba jidkiisu u leexday, oo* ***RABBIGU wuxuu isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan****. … Naftayduna Ilaahayga bay ku farxi doontaa, waayo, wuxuu ii xidhay dharkii badbaadada,* ***oo wuxuu i huwiyey khamiiskii xaqnimada****.*" (Ishacyaah 53:1, 5-6; 61:10)

*"Hadalkii aan idinku wacdiyey … oo waxa weeye, Masiixu wuxuu u dhintay dembiyadeenna* ***sida Qorniinku leeyahay****, waa la aasay isaga, oo maalintii saddexaad ayaa la sara kiciyey,* ***sida Qorniinku leeyahay****.*" (1 Korintos 15:2-4)



- Sidee baad u aragtaa Ciise?
- Maxaad ka aamminsan tahay waxa ku saabsan noloshiisa, dhimashadiisa, aaskiisa iyo sarakiciddiisa?
- Sheekadiisii sidee bay u saameysay sheekadaada?



*"Haddaad afka ka qiratid in 'Ciise yahay Rabbiga', oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa. 'Ku alla kii magaca RABBIGA ku baryaa, waa badbaadi doonaa.'"*

(Rooma 10:9,13; Nebi Yoo'eel 2:32)

Xigashada Qorniinka waxaa laga soo qaatay Kitaabka Quduuska Ah ©2008 Society for International Ministries

## Baaritaan Dheeraad Ah





Ma doonaysaa inaad baaritaan dheeraad ah ku sameeysid **sheekada** Abuurahaaga **iyo farriintiisa**? Baar laba buug oo qoraha yahay kan qoray ***Sheekadaada***: **www.one-god-one-message.com**

*Ilaah keliya iyo kitaab keliya* **–**Safar oo la akhrinaayo Qorniinnada, taasoo ku siinayso qaab aad dib uga fikirtid su'aalaha noloshu ugu waawayn.

*"Buuggan markaad akhrisid kadib waxyaalaha Baybalka kujira oo dhan baa fikirkaygu macquul ula noqonaya. Waxay igu abuurtay inaan Baybalka akhriyo."* —Maxamed, Bariga Dhexe

*Boqorka Ammaanta*—Buuggan iyo filinkiisa wuxuu tusay sheekada iyo farriinta ugu fiican. Bal akhriso buugaagta / Fiiri filinka: **www.rockintl.org/rock-video/boqorka-ammaanta-somali-king-of-glory**




*"Dib u sheeginta sheekada Baybalka aad bay u xiiso badan tahay! Sawirrada quruxda badan waxay soo jiidanaysaa fikradda dhallinyaradu iyo dadka waawaynba."*
—Janice, Waqooyiga Ameerika




**www.king-of-glory.com**

**Waxa dhammaan ka sarreeyaa bal u tag meesha waxa oo dhan ka yimaaday. Akhri oo ka fikir ereyga saafiga ah ee Ilaah. Baybalka, qayb qayb ama isagoo dhan, waad ku heli kartaa 2500 afafood.**

Bogaadinta:

www.rockintl.org

©2022 ROCK International

P.O. Box 4766, Greenville, SC 29608
www.king-of-glory.com • resources@rockintl.org

YOUR STORY • Somali